

IIB MA GALO

# FAAFINTA



الرسمية

# RASMIGA AH

الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراتية

Sannadka 8aad Muqdisho 2 Luulyo 1980 L. 7

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAH : waa 5 shilin Inbar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — djbedana waa Sh. So. 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo waxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulkà Fààfinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaà Xafiiska Canshuurahà ee Wààràddà Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA

KOWAAD

W. M.

QAYBTA

LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 72 ee

1 Juunyo 1980, Dallacaad L. Kiddigle  
Maxamed Sh.

Bogga 697

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 73 ee

9 Juunyo 1980, Beddel & Magacaabid  
Garsoorayaal

» 698

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 74 ee

19 Juunyo 1980, Magacaabid Kuxi-  
geenno Xeer Ilaaliyaha Guud ee Max-  
kamadda B. Dalka

» 699

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 75 ee

19 Juunyo 1980, Magacaabid Guddoo-  
miye Kuxigeen Maxkamadda Badbaa-  
dada Dalka

» 700

Madbacadda Qaranka

- XEER WASAARADDA H. GUUD L. 76 ee  
11 Agoosto 1980, Qaadid Xoogga Ko-  
wareegtay W.Xoogga Korontada » 702
- » WASAARADDA H. GUUD L. 77 ee  
10 Feb. 1980, Siismo dhul Dawladeed  
loo isticmaali doono Dan Caam (Mas-  
jid). rontada ee Degmada Marka oo ay la » 705
- » WASAARADDA H. GUUD L. 78 ee  
4 Maars 1980, Cad dhul Dawladeed  
oo ku yaal Degmada Wardhiigley oo  
loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Dr.  
wakaal ah; Sheekh Axmed Nuur » 707
- » WASAARADDA H. GUUD L. 79 ee  
4 Maars 1980, dhul Dawladeed loo is-  
ticmaal loo siiyey loona aqoonsaday  
J/le Dalmar Maxamed Cali  
mar Maxamed Cali » 710
- » WASAARADDA H. GUUD L. 80 ee  
4 Maars 1980, Cad dhul Dawladeed  
oo ku yaal Degmada Wardhiigley oo  
loo ogladay dhismihiisa J/le Dr. Xa-  
san Nuur G. » 713
- » WASAARADDA H. GUUD L. 81 ee  
19 Maars 1980, Xeer Wasaaradda H.  
Guud kuna saab san dhul Dawladeed  
oo Dowladda la noqotay » 715
- » WASAARADDA H. GUUD L. 82 ee  
6 Maajo 1980, dhul Dawladeed uu sii-  
say, gacantana loo geliyey J/le Yarey  
Aadan Ibraahim » 718

QAYBTA

SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN IYO WIXII LA MID AH.

W.M.

Q A Y B T A 2AAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 72 ee  
1.6.80 Dallacaad.

MADAXWEYNAHA JDS

ASAGOO ARKAY : Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad,

ASAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 2 ee 23.12.72 ee ku  
saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed

ASAGOO TIXGELIYEY : Talada uu soo jeediyey Ta-  
liyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeey ee ku qor-  
nayd xaashidiisa XOG/A/8.1 ee 1.6.1980ka:

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad.

L/Xidiggle Maxamed Shire Warsame oo ka tirsan  
Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed waxaa loo dallacsiiyey  
derejada Dhamme marka laga billaabo 1.6.1980ka

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana  
lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 1.6.1980ka

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay  
Diiwaanka Lamb. 4 bogga lamb. 46,  
Muqdisho 10. Juun 1980  
ku X. Hantidhowraha Guud  
Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 73 ee  
9 Juunyo 1980 Beddel & Magacaabid  
Garsoorayaal

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Warqadda 1aad, 2aad, iyo tan  
3aad ee Kacaanka.

MARKUU ARKAY : Sharciga lambrkiisu yahay 18 ee  
1da Luulyo 1974

MARKUU ARKAY : Sharciga lambrkiisu yahay 3 ee  
10ka Jannaayo 1974 kuna saabsan Dhisma Maxka-  
madda Badbaadada Dalka iyo Sharciyadii ka dam-  
beeyey ee lagu toosiyey.

ISAGOO TIXGELIYEY : Talada Guddoomiyaha Max-  
kamadda Badbaadada Dalka

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qod. 1aad

- 1) Jaalle G/Le Xasan Maxamed Nuur Lataliyaha MBD waxaa loo magacaabay in uu Guddoomiye ka noqdo Maxkamadda Badbaadada ee Gobolka Wagooyi Galbeed.
- 2) Jaalle Xasan Maxamuud Cusmaan (Junbur) Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadad Gobolka W/ Galbeed, waxaa loo beddeley Maxkamadda Badbaadada ee Xamar.

Qod. 2aad

Yeerkhan wuxuu dhaqan gelayaa mar alla makiu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadad Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Juun 1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
J/le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,  
Diiwaanka Lamb. 5 bogga lamb. 15,  
Hantidhowraha Guud K.M.G.  
Muqdisho 22. 6. 1980  
Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 74 ee  
eenno Xeer Ilaaliyaha Guud ee MBD.

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga tirsigiisu yahay 3 ee  
10kii Jennaayo 1970, kuna saabsan dhismaha  
Maxkamadda Badbaadada Dalka, iyo Bedallaadii ku  
dhacday;

MARKUU TIXGELIYEY : in ay lagama maarmaan  
tahay in Hawlwadeenno lagu xoojiyo Xeer Ilaalinta  
Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka si awood-  
deeda wax qabad sare loogu qaado, la isuguna  
dheellitiro culeyska hawlahaa ay ka xilsaaran tahay  
iyo Ciidanka ka shaqeeya;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

G/Sare Axmad Cabdulle Shuceyb iyo Gaashaanle  
Shariif Sheekhunaa Maye oo labada ka tirsan Ciidanka  
Booliska Soomaaliyeed, waxaa lagu magacaabay Kuxi-  
geenno Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaa-  
dada Dalka.

Qod. 2aad

Xeerkana wuxuu dhaqan gelayaan laga billaabo 20ka  
Juun 1980, waxaana lagu soo saarayaafaa finta Rasmi-  
ga ah ee JDS.

Muqdisho, 19 Juunyo 1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.  
J/le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka lamb. 5 bogga lamb 16

Muqdisho 22 Luuliyo 1980,

Hantidhowraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

XEER MTDTXWEYNAHA JDS L. 75 ee  
19Juunyo 1980 Magacaabid Guddoo-  
miye Kuxigeen Maxkamadda badbaa  
dada Dalka:

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY : Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY : Sharciga tirsigiisu yahay 3 ee  
10kii Jannaayo 1970, kuna saabsan dhismaha Max-  
kamadda Badbaadada Dalka, iyo beddelaadii ku  
dhacday

MARKUU ARKAY : culeyska hawlahaa Maxkamadda  
Badbaadada, tixgeliyeyna lagama maarmaannima-  
da dedejinta hawlahaa caddaaladda la xiriira;

MARKUU TIXGELIYEY : in uu magacaabid Guddoo-  
miye kuxigeen kale Maxkamadda Badbaadada Dal-  
ka ay kaalin ka geysan karto kor ku xusan;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Dr. Xasan Maxamed Cusmaan «Jumbur» waxaa  
lagu magacaabay Guddoomye Kuxigeen Maxkamadda  
Badbaadada Dalka.

Qod. 2aad

Hawlahaa guud ee Maxkamadda ka sokow, Guddoo-  
miye Kuxigeenku wuxuu si gaar ah uga maamul yahay  
dacwadaha madaniga, maamulka, shaqada iyo fulinta

Qod. 3aad

Guddoomiye Kuxigeenku wuxuu yeelanayaan gunno  
u dhiganta midda Guddoomiye Kuxigeenka Maxkamad-  
da Sare, waxaana laga bixinaya Miisaaniyadda Agaa-

sinka Guud lacagta Madaxdooyada Jamhuuriyadda Di-moqaraadiga Soomaaliya.

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhqan gelayaa laga billaabo 20ka Juun 1980.

Muqdisho, 19 Juunyo 1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.

J/le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre  
Sax. S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY  
Diiwaanka Lamb. 5 bogga 17  
Muqdisho 22 Luuliyo 1980,  
Hantidhowraha Guud KMG  
Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 76

ee 11 Goosto 1979

ee 11 Agoosto 1979, qaadid xagga korontada ee  
Degmada Marka;

JAMHUURIYADDA DIM. SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.

WASIIRKA

ANNAGOO ARAGNAK : Warqaddii koowaad, labaad,  
iyo tii saddexaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY : Sharciyada lamb. 17,18,19 ee  
soo baxay 1dii Luulyo 1976 oo ku saabsanaa Xukun-  
ka Dalkd oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaaggaa  
Kacaanka Soomaaliyeed;

ANNAGOO ARAGNAY : Qoraal (ATTO) lamb. 7157  
Rep. taariikh. 4 Dic. 1964, lagu diiwaan geliyey Xa-  
mar 9.1.65 lamb. 24 Atti pubblici Vel.6 oo ah cad-  
deynta Notaayada Dr. Maxamed Warsame Cali Da-  
neet, taas oo Massimo Galletti, oo u ah wakiil Fran-  
ko Galletti, wuxuu ka gaday kuna wareejiyey She-  
riif Nuur Cali Leel wax allaale wixii xuquuq ah oo  
ku saabsan Korontada ee ku yaal Degmada Marka  
,taas oo lala wareegay taariikhdu markay ahayd  
11.1973;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda lamb. yahay Biis.  
WD/52.1645.77 ee soo qoray Agaasimaha Waaxda  
Degmooyinka ee WXKU INJ. Axmed Cabdullaahi  
Cali;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda lamb.WXKD.53.77  
taariikhdeeduna ahayd 9.4.1977 ee ay soo qortay  
Kakaaladda Xooggaa Korontada ee degmada Mar-  
ka, oo ay ku caddayneysa waqtigala kalaqoray  
Shaqaalahi iyo lacagta Bankigu ku lahaa;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda caddeynta kala wa-  
reejinta Korontada Marka taariikh. markay ahayd

1da Disembar 1973 loonana kala wareegtay sida socota.

Xilkii waxaa lagala wareegay Guddoomiyaha Shir-kadda Korontada Marka. Shariif Nuur Cali Leel, wa-xaana kala wareegay :-

1) Guddoomiyaha Degmada Marka Cabdisalaam Macallin Aadan (2) Xoghayaha Degmada Marka Cabdi Haybo Maxamed.

Xilalka wareegidda waxaa goobjoog ka ahaa:-

1) Agaasimaha Guud WXKU Cali Saciid Carraale,

2) Agaasimaha Waaxda Dawladda Hoose Sheriif Nuur Imankiyo, (3) Gudd. Guddiga wareejinta Inj. Maxamed Xawaadle Madar.

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda lamb.WD.52.716.79 taariikhdeeduna ahayd 1.3.1979 ay soo qortay Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda ee halkaan ku lifaaqan, iyadoo ku soo caddeysay magdhawga Saldhigga Korontada ee Degmada Marka;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda qiimeynta qalab-ka Korontada iyo matoorada ee Degmada Marka oo ay soo sameeyeen Guddi loo xilsaaray kana koo-ban :-

1) Inj. Maxamed Xawaadle Madar.

2) Inj. Axmed Cabdullaahi Cali, taasoo muujinaya-sa qiimaha Korontada iyo matoorada in uu yahay lacag dhan Sh.So. 407.495,00/= hasa yeeshie laga jaray lacagtii lagu lahaa BankiguSh.So.87.608,00/= iyo lacagtii xuquuqdii Shaqaalahu ku meel gaarka ahaa ee Wakaaladda Xoogga Korondada Degmada Marka Sh.So.71.239,70/= sidaasna qiimaha dhammaadka noqday lacag dhan Sh.So.248.648,20/=(la-ba boqol afartan iyo siddeed kun lixboqol afartan siddeed iyo 20/Senti) eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan;

X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday dan Guud awgeed Korontada ee Degmada Marka, ay lahayd Shirkadda Korontada, kana wakiil ahayd Jaalle Shariif Nuur Cali Leel, iyadoo loo celinaayo magdhaw gaaraya Sh. So.407.495,90/= hase yeeshay laga jaray lacagtii lagu lahaa Shirkadda hore (S.E.I.S.) kuna lahaa Bankigu Sh.So.87.608,00/= iyo lacagtii xuquuqdiidha Shaqaalah Sh.So.71.239,20/= sidaasna qiimaha dhammaadka noqday lacag dhan Sh.So.248.648,20/=(laba boqol afartan iyo siddeed kun lix boqol afartan iyo siddeed iyo20/senti) eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan.

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinayaa Mii-saaniyadda Wasaaradda Maaliyadda ee sannadka 1979, madax-xige 2.2.0.(J).

Muqdisho, 11 Agoosto 1979.

WASIIRKA WAS. MAALIYADDA

W.S. Maxamuud Yuusuf Weyrax

WAS.WAS.WAS. HAWLAHA GUUD

W.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb; 1 Bogga lamb.42

Muqdisho, 13 Agoosto 1979.

Hantidhowraha Guud KMG

W.S. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 77 ee  
10 Feb. 1980 Siismo dhul Dawladeed  
loo isticmaali doono Dan Caan (Mas-  
jid) kana Wakiil ah:- Sheekh Axmed  
Nuur Macallin iyo Xirtiisa kuna yaal  
Deg. Wadajir kuna fadhiyamq. 22.500.-

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.

WASIIRKA

ASAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Di-  
moqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19 ee  
-da Luulyo 1976,kuna saabsanaayeen Xukunka Dal-  
ka oo la wereegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaan-  
ka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay  
13kii Settembre1973 oo ku saabsan oggolaanshaha  
dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jenna-  
yo 1967 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa kana soo bax-  
day Wasaaradda Gaashaandhigga JDS. Summad.  
J.V.5-116.79 taariikhdeeduna ahayd 7.7.1979 kuna  
weydiistay dhismo cad dhul Dawladeed oo ku yaal  
(Muqdisho),

ISAGOO ARKAY : Warqadda lamb. yahay XWG.24-3  
1486 taariikhdeeduna ahayd 25.9.1979 oo ay noo soo  
qoray Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, iya-  
doo ku weydiisannaayo in la siiyo dhul Damanyaaa-  
le ah, addimihiisuna yihiin mt. 150X150;

ISAGOO ARKAY : Warqadda Hubsimada dhulka soo sameeyeen Sahmiye Abuukar Maxamed Sheekh iyo Inj. Cabdikariin Cige Guuleed ka tirsan waaxda sa-hanka iyo Deg. Mag. ee Wasaaradda Hawlaha Guud taariikhdeeduna ahayd 11.11.1979; in dhulkaas ku fadhiya mq. 22500/= kuna yaal Deg. Wadajir.

ISAGOO ARKAY : Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaanna loogu dhajiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 1846 kuna saab-san dhismo Masjid oo ay aqoonsadeen Guddiga Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaalaynta ee Wasaa-radda Hawlaha Guud ee Muqdisho, Deg. Wadajir.

#### WUXUU XEERAYAA

Waxaa la caddeynayaa in la siiyey loona aqoonsa-day Sheekh Axmed Nuur Macallin iyo Xirtiisa, dhul Dawladeed, lagana dhisidoono Masjid, dhul cabirkii-su yahay mt.180X125 kuna fadhiya mq.22.500/=kuna yaal Muqdisho, Degmada Wadajir.-

#### SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU TILMAA.

Woqooyi waxaa ka xiga : Waddo.

Koonkur waxaa ka xiga : Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed.

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed

Muqdisho, 10 Feb. 1980.-

#### WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
Inj.Maxamed Xawaadle Madar

WaanAragnay ee Diiwaangeliinay  
Diwaanka lamb. 5 bogga lamb.3.  
Muqdisho, 13 Feb. 1980.  
Hantidhowraha Guud KMG.  
Yuusuf Cali Nuur.-

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 78 ee  
4 Maars 1980 Cad dhul Dawladeed  
oo ku yaal Demada Wardhiigley oo  
loo oggolaaday dhismahiisa Jaalle Dr.  
Cabdullaahi Maxamed Cilmi.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.  
WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoq-  
raadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19 ee  
1da Luulyo 1979, kuna saabsan Xukunka Dalka oo  
la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka  
Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxay  
13kii Settembre 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha  
dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 144 soona baxay 23  
Maajo 1961 oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday  
Salaad Cali Siyaad taariikhdu markay ahayd 27Nof.  
1957, kuna waydiistay dhismo cad dhul Dawladeed  
oo ku yaal (Muqdisho) Degmada Wardhiigley;

ISAGOO AQOONSADAY : Caddeynta dhulka, kuna  
saabsan cad dhul Dawladeed ah oo uu weydiistay  
Jaallehaas ogeysiis ahaanna loogu Faafiyey Daw  
ladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Ras-  
miga ah ee Dawladda, iyadoo aan cidna horistaa-  
gin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 9557, kuna  
saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsa-  
deen Guddi dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muq-  
disho fadhigoodi 272aad taariikhdeeduna ahayd  
15 Luulyo 1961;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb.6631 taas oo bedshay middii hore oo lambkeedu ahaa 9557 laguna aqoonsaday fadhigii 291aad ee Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muqdisho taariikhdeeduna markay ahayd 18.7.1962, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 126 taas oo beddeshey middii hore oo lamb. ahaa 6631 laguna aqoonsaday fadhigii 5aad ee Guddiga Waxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.G. taariikhdeeduna markay ahayd 12.2.1977 kuna saabsanayd dhismo Guri kuna fadhiya mq.1040/;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. yahay 461 ee 10 Ottobre 1962, kuna soo baxday Xafiiska Canshuura-ha Daban, taas oo caddeynaysa in Salaad Cali Siyaad uu bixiyey lacag dhan Sh.So. 2.090/=kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSADAY : Dhulka laweydiitay, oo ku fadhiya mq.1.040/= tilmaan cadna laga siiyey Salaad Cali Snyaad sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka taariikhdeeduna ahayd 20 Noofeenbar 1962;

ISAGOO ARKAY : Xaqijintii Farsamada Sah.Abukar Maxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta dhulka, taariikhdeeduna ahayd 2.6.1979 taas oo caddeynaysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen waaxda sahanka iyo Degaanka Magaalaynta lamb. yahay 126 taariikhdeeduna 1.2.1977 laguna xaqijinayey si ay naqshaddu guriga waafaqsantahay kuna fadhiya mq. 1.040/;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (NULLA OSTA) degsimada Guriga oo ku dhisan Xamar Degmada Wardhiigley laguna siiyey xaashada lamb. ebere taariikhdeeduna ahayd 25 Febe. 1979, ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar (Xafiiska Farsamada dhulka).

ISAGOO ARKTY: Qoraal (Atto) lamb. 16644 Rep. taariikh. 9.6.1975, lagu diiwaan geliyey Xamar 9.6.1965, lamb. 199 Atti pubblici Vol. 66 oo ah caddeynta Notaayada Dr. XASAN WARSAME CALI taas oo SALAAD CALI SIYAAD ka MED CILMI wax allaale wixii xuuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismahii ku yaal dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1040/= kuna yaal Muqdisho — Degmada Wardhiigley;

ISAGOOGO TIXGELIYHEY : wax allaale wixii xeer ahaaoo ku saabsan siismada iyo gacan u gelinta dhulka Dawladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in xuquqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magaciisa kor ku qoran;

#### WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Dr. Cabdullaahi Maxamed Cilmi in uu dhisto (Dekereeto di concessione e conseguente libera disponiblità) dhul kaasi oo ku fadhiya mq. 1.040/= kuna yaal Muqdisho, Deg. Wardhiigley.-

Muqdisho, 4 Maars.

WASIIRKA WAS. HAWLAHA GUUD  
S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY  
Diiwaanka lamb. 1 Bagga lamb.5  
Muqdisho, 12 Maars 1980.  
Hantidhowrka Guud KMG  
W.S. Yuusuf Cali Nuur  
W.S. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 79 ee

4 Maarsio 1980, Dhul Dawladeed oo  
isticmaal loo siiyey loona aqoonsaday  
(Libera Disponibilità) Jaalle Dalmar  
Maxamed Cali kuna yaal Muqdisho  
Degmada Hodan,kuna fadhiya mq.1.  
904/-.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuhuuriyadda Di-  
moqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19 ee  
1da Luulyo 1976, kuna saabsanayeen Xukunka Dal-  
ka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Ka-  
caanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga Dhulka lamb. 41  
soona baxday 13kii Settenbre 1973;

IASAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jen-  
naayo 1967, oo la xiriira qiimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday  
Ciise Cali Axmed taariikhdu markay ahayd 31 Mar.  
1977, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed  
oo ku yaal (Muqdisho) Degmada Hodan;

ISAGOO AQOONSADAY : Caddeyntha dhulka, kuna  
saabsan cad dhul Dawladeed ah, ee uu weydiistay  
Jaallahaas ogeysiis ahaanna loogu faafiyey looxa  
Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta  
Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo aan cidna horis-  
taagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. yahay 1219, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee W.H.G. ee Muqdisho fadhiboodii 16aad taariikhdeeduna ahayd 15.8.1978;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 1978 taas oo bed-deshay middii hore oo lambkeedu ahaa 1219 laguna aqoonsaday fadhiboodii 1aad ee Guddiga Waaxda Sah. iyo Deg. ee W.H.G. taariikh/duna ahayd 12.12.1979, kuna saabsaneed dhismo Guri kuna fadhiya mq.1. 904/.

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. 970836 ee 19.8.78, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeynaysa in CiiseCali Axmed uu bixiyey lacag dhan Sh.So.1.904/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSADAY: Dhulka la weydiistay, oo ku fadhiya baaxadda mq.1.904/= tilmaan cadna laga siiyey Ciise Cali Axmed sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 23.8.1978;

ISAGOO ARKAY : Xaqijintii Farsamada Sah. Abuu-kar Maxamed Sheekh, kana tirsan Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. taariikhdeeduna ahayd 20.2.1980 taas oo caddeynaysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. ee W.H.G.lamb. 1978 taariikhdeeduna ahayd 12.12.1979 laguna xaqijiyye sida ay naqshadda Guriga waafaqsan tahan kuna fadhiya mq.1.904/.

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (Nulla Osta) deg-ganaashada Guriga oo ku dhisan Xamar Degmada Hodan, laguna siiyey xaashida lamb.714/79 ee ka soo baxday Xafaaska Farsamada dhulka ee Daw-ladda Hoose;

ISAGOO ARKAY : Qoraal (ATTO) lamb.8877 ee 26.8.  
1978 lagu diiwaan geliyey Xamar 26.8.1978 lamb.  
338 Qoraal Dawladeed Bogga lamb. 22, oo ah cad-  
deynta Notaayaha Dr. Maxamuud Xuseen Diirshe,  
oo ku saabsan cad dhul dhismahiisa ku yaallay  
cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq.1.904/;  
kuna yaal Muqdisho Degmada Hodan;

ISAGOO TIXGELIYEY : in wax allaale wixii xeer  
ahaa oo ku saabsan siismada iyo gacan u gelinta  
dhul Dawladeed (Concessione e conseguente libera  
disponibilità) oo ay ujeeddadiisu tahay in xuquuq-  
da Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha magacii-  
sa kor ku qoran;

#### WUXUU XEERAYAA

Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo ge-  
liyey, loona aqoonsaday Dalmar Maxamed Cali; dhul  
ku fadhiya mq.1.904/= kuna yaal Muqdisho Degmada  
Hodan.-

Muqdisho, 4 Maars 1980.-

#### WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
S/GUUTO MXAMUUD NUUR GALAAL

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY  
Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb.4.  
Muqdisho, Mar. 1980.  
Hantidhowrka Guud KMG  
W.S. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 80 ee  
19 Juunyo Xeer Wasaaradda Hawla-  
ha Guud kuna saabsan Dhul Dawla-  
deed oo Dawladda la noqotay.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.

WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimo-  
qraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharchiyada lamb.yihiin 17,18,19 ee  
1da Luulyo 1976, saabsanaayeen Xukunka Dalka  
oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaan-  
ka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Qod. 9 ee Sharciga tirs.yahay 41  
soona baxay 13 Sebtembre 1973 oo si tafatiran u  
faafaa hinaya la wareegidda dhulka;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA

QOD.1aad

Waxaa lala noqday Dhul Dawladeed oo horay Wa-  
saaraddan ay dadweynaha u soo weydiisteen lana sii-  
yey, haatanna dan Guud awgeed ay Wasaaradda Wax-  
barashadu u baahatay loona wareejinayo.

Dhulkaas waxaa horay loo siiyey:-

- 1) Maxamed Nuur Cabdullaahi Deg. Wadajir Gal Lr.  
871/78.
- 2) Ibraahim Xaa ji Xaashi Diiriye Deg.Wadajir Gal Lr.

- 3) Ibraahim Xawaadle Madar Deg. Wadajir Gal Lr. 851/78.
- 4) Sheekh Aadan Xersi Faarax Deg. Wadajir Gal Lr. 189/75.
- 5) Caasha Shariif Cumar Deg Wadajir Gal Lr. 835/77.
- 6) Sahra Xaaji Cabdi Jaamac Deg. Wadajir Gal Lr. 852/78.
- 7) Kinsi Maxamed Cali Deg. Wadajir Gal Lr. 1139/78
- 8) Xaawa Cabdullaahi Samatar Deg. Wadajir Gal Lr. 245/77.

QOD.2aad

Dadka dhulkaas horay loo siiyay ee magacyadoodu ku qoran yikiin Qod. 1aad waxaa loo celinayaa mag-dhaw ah qimaha dhulka ama dhul kale.

QOD. 3aad.

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda wuxuuna dhaqan gelayaa is-la maalinta uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda H. Guud.

Muqdisho, 19 Maارس 1980.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

S/GUUTO MXAMUUD NUUR GALAAL

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY

Diiwaanka lamb. 1 Bogga lamb. 11.

Muqdisho, 29 Maارس 1980.

Hantidhowrka Guud KMG

W.S. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 81 ee  
4 Maarsio 1980 Cad dhul Dawladeed  
oo ku yaal Deg. Wardhiigley oo loo og-  
golaaday dhismihiisa Jaalle Dr.Xasan  
Nuur Guuleed.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.  
WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyadda Dimo-  
qaaraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb. yihiin 17,18,19 ee  
1da Luulyo 1976, kuna saabsanaayeen Xukunka  
Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Ka-  
caanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. 41 soona baxday  
13kii Settembre 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha  
dhulka dhismaha;

ISAGOO ARKAY : Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jen-  
naayo 1967 oo la xiriira qimaha dhul bixinta;

ISAGOO ARKAY : Arjigii codsiga ahaa uu keensaday  
Xasan Nuur Guuleed taariikhdu markay ahayd 18  
Maajo 1972 kuna waydiistay dhismo, cad dhul Daw-  
ladeed oo ku yaal (Muqdisho) Deg. Wardhiigley;

ISAGOO AQOONSAN : Caddeynta dhulka, kuna saab-  
san cad dhul Dawladeed ah ee uu weydifitay Jaalla-  
haas ogeysiis ahaanna loogu faafiyey Dawladda  
Hoose ee Xamar, laguna qoroy Faafinta Rasmiga  
ah ee Dawladda iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO RAKAY : Naqshadda lamb.yahay 2003, kuna  
saabsan dhimo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsa-

deen Guddiga Dhismaha ee Dawladda Hoose ee Muqdisho fadhigoodii 3aad taariikhdeeduna ahayd 9.5.1976;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 86 taas oo bedeshay middii hore oo lambkeedu ahaa 2003, laguna aqoonsaday fadhigii 2aad ee Guddiga Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. taariikhdeeduna markay ahayd 16.1.1979, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb.yahay 326982 ee 12.8.76, kana soo baxday Xafiiska Cashuurta Dadban, taas oo caddeynaysa in Xasan Nuur Guuleed uu bixiyey lacag dhan Sh.So.378/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN : Dhulka la weydiistay oo ku fadhiya mq.252/. tilmaan cadna laga siiyey Xasan Nuur Guuleed, sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka taariikhdeeduna ahayd 2.9.1976;

ISAGOO ARKAY : Xaqijinta Far/mada Sah. Abuukar Maxamed Sheekh, kana tirsan Waaxda Sah. iyo Deg. Maggalaynta, dhulka taariikhdeeduna ahayd 24.12.1979 taas oo caddeynaysa in naqshadda dhismaha ee ay oggolaadeen Waaxda Sah.iyo Deg. Mag. lamb.yahay 86 taariikhdeeduna ahayd 16.1.1979 laguna xaqijiyyey sida ay naqshaddu guriga waafaaq-san tahay kun afadhiya mq.252/; ;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanshaha (NULLA OSTA) degsiimada guriga oo ku yaal Degmada Wardhiigley laguna siiyey xaashida lamb.7394 taariikhdeeduna ahayd 28.11 1979 ee ka soo baxday Dawladda Hoose ee Xamar, (Xafiiska Farsamada dhulka);

ISAGOO TIXGELIYEY : In wax allaale wixii xeer ahaa oo ku saabsan siismada iyo gacan u gelita dhulka Dawladeed (Concessione e conseguente libe-

cad dhul Dawladeed lagama maarmaan tahay in  
xuquuqda Sharciga ahaa loo aqoonsado Jaallaha  
magaciisa kor ku qoran;

WUXUU XEERAYAA

Waxaa cad dhul Dawladeed la siiyey, gacantana  
loo-geliyey, loona aqoonsaday Dr. Xasan Nuur Guuleed  
in uu dhisto (Dekereeto di concessione e conseguente li-  
bera disponibilità) dhulkaasi oo ku fadhiya mq.252/=  
kuna yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley.-

Muqdisho, 4 Maars 1980.

WASIIRKA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
S/GUUTO MXAMUUD NUUR GALAAL

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY

Diiwaanka lamb.1 Bogga lamb.7.

Muqdisho, 12 Maars 1980.

Hantidhowrka Guud KMG

W.S. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 82 ee  
6 Maajo 1980 Dhul Dawladeed uu sii-  
say, gacantana loo geliyey (Libera  
Disponibilità) Jaalle Yarey Aadan Ib-  
raahim, ku yaal Muqdisho Degmada  
Wardhiigley, kuna fadhiya mq.1.156.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD  
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAG.  
WASIIRKA

ISAGOO ARKAY : Warqaddii koowaad labaad iyo tan  
seddexaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lamb.yihiin 17,18, & 19  
soo baxday 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Xukun-  
ka dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga  
Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY : Xeerka Sharciga dhulka lamb.41  
soona baxay 13kii Sebtembre 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lamb. 115 soona baxday 13kii  
Sebtembre 1975

ISAGOO ARKAY : Arjigii uu keensaday Cabdi Maxa-  
med Faarax taariikhdu markay ahayd 29.11.1957  
kuna waydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed,kuna  
yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley;

ISAGOO AQOONSADAY : Naadada dhulka kuna saab-  
san cad dhul ah, la weydiistay ogeysiis ahaanna  
loogu dhejiyey looxa Dawladda Hoose ce Xamar,  
laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda,  
iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb.yahay 3662, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 269aad taariikhdeedu ahayd 10kii Aprile 1961;

ISAGOO ARKAY : Naqshadda lamb. 42 taas oo bedeshay middii hore oo lambrkeedu ahaa 3662 laguna aqoonsaday fadhigii 7aad ee Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 7aad ee 20kii Settembre 1969;

ISAGOO ARKAY : Bolleetada lamb. yahay 4452 ee 16 Maajo 1961, kuna soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeynaysan in Cabdi Maxamed Faarax uu bixiyey lacag dhan Sh.So.655,00/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSADAY : Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq.1.156=/ loona tirihey Cabdi Maxamed Faarax sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 9kii Jennayo 1963;

ISAGOO ARKAY : Warqadda uu qoray qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaamaysa dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY : Xaqijintii farsamada Sah. Abuu-karMaxamed Sheekh kana tirsan Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. taariikhdeeduna ahayd 10.12.1978, taas caddeynaysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha Dawladda Hoose taariikhdu markay ahayd 20kii Settembre 1969 laguna xaqijihey sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay kuna fadhiya mq.1.156/; kuna yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley;

ISAGOO ARKAY : Oggolaanta (Nulla Osta) degsimada buriba ku dhisan Xamar Degmada Wardhiigley, laguna siiyey warqadda lamb.yahay 1082 ee 15

Juunyo 1978 ee Dawladda Hoose ee oo caddeynay-sa in dhismaha waafaqsantahay naqshadda;

**ISAGOO ARKAY :** Qoraal (Atto) lamb. 8427 Rep. taa-riikh 14.12.66 lagu diiwaan geliyey Xamar 20.12.1966 al n.997 Atti pubblici Vol.18 oo ah caddeynta Notaayada Michel Joseph Mariano taas oo Cabdi Maxamuud Faarax (Cabdi Naamuus) ka gaday kuna waareejiyey Yarey Aadan Ibraahim wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhisimihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.156/= kuna yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley;

**ISAGOO AQOONSADAY :** In la tixgeliyey wax allaale wiixii waajib ahaa kuna saabsan siismadu iyo ga-can u gelintu dhulkä Dawladda (Concessione e conseguente libera Disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saarayaa.

### X E E R

Waxaa cad dhul Dawladeed uu siisay, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Yarey Aadan Ibraahim in ay dhisato (Dekereeto di concessione e conseguente libera Disponibilità) dhul kaasi oo ku fadhiya mq. 1.156/; kuna yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley.

Muqdisho, 6 Maajo 1979.

K/S. WASIIRKA WAS. HAWLAHA GUUD  
W.S. MAXAMED BURAALE ISMAANCHIL

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY**

Diiwaan lamb. 1. Bogg'a lamb. 8

Muqdisho, 14 Maajo 1979.

Hantidhowrka Guud KMG

W.S. Yuusuf Cali Nuur